

2022-2023 CODSIGA BARNAAMIJKA TAMARTA EE MINNESOTA

Codsiga barnaamijka Tamarta ee Minnesota waxa lagu helayaa luuqadaha Hmong, Soomaali, Isbaanish, Fiitnaamiis, ama qoraal daabacan oo weyn oo laga helayo Adeeg Bixiyaahaaga ama dhanka khadka oo laga helayo mn.gov/energyassistance

Codsigan waxa loo adeegsadaa in lagu codsado barnaamijyadan:

- Barnaamijka Taageerada Tamarta (EAP)
- Barnaamijka Taageerada Cimilada (WAP)
- Barnaamijka Kor-u-qaadista Tashiilka (CIP)

Sida codsigan loo buuxiyo

- Akhri dhammaan macluumaadka codsigan la socda.
- Ku buuxi macluumaadka qof kasgta oo gurigaaga ku nool. DHAMMAAN dadka ku nool gurigu waa xubnaha qoyska haddii ay dadkaasi wadaagaan kijada ama qaybaha kale guriga lagaga nool yahay.
- Dhammeystir oo u keen Adeeg Bixiyahaaga codsiga, caddeynta dakhliga iyo dukumeentiyada kale.
- Waa inaan heynaa dukumeentiyada oo dhameystiran si aan u go'aamino inaad u qalanto barnaamijka iyo in kale.

Haddii aad u baahato in buuxinta codsiga lagaa caawiyo, wac Adeeg Bixiyahaaga Maxalliga ah ee EAP. Lambarka taleefankooda wuxuu ku qoran yahay bogga koowaad ee Codsiga Barnaamijyada Tamarta ee Minnesota.

Si necesita ayuda para completar esta solicitud, comuníquese con su proveedor de servicio del PAE local. El número de teléfono se encuentra en la primera hoja de la solicitud de los Programas de Energía de Minnesota.

Haddii aad u baahato in buuxinta codsiga lagaa caawiyo, wac Adeeg Bixiyahaaga Maxalliga ah ee EAP. Lambarka taleefankooda wuxuu ku qoran yahay bogga koowaad ee Codsiga Barnaamijyada Tamarta ee Minnesota.

Yog koj xav tau kev pab sau daim ntawv thov no, hu rau Tus Neeg Muab Kev Pab EAP hauv koj cheeb tsam. Lawv tus xov tooj yog teev rau ntawm thawj nplooj ntawv ntawm Daim Ntawv Thov Minnesota Cov Khoo Kas Pab Them Nqi Hluav Taws Xob.

Nếu quý vị cần hỗ trợ để điền vào đơn đăng ký này, hãy gọi cho Nhà Cung Cấp Dịch Vụ EAP tại địa phương của quý vị. Số điện thoại của các nhà cung cấp được liệt kê trên trang đầu tiên của Đơn Đăng Ký Chương Trình Năng Lượng Minnesota.

Dir caddeynta dakhliga

- Soo dir caddeynta dakhliga guud ee ay heleen dhammaan dadka qoyskaaga ee 3-da bilood ee buuxa ee ka horeeya bisha aad saxee xayso codsiga. Dir nuqullo, dukumeentiyada asalka ah laguuma soo celin doono.

Codsiga waxa saxee xay:	Dir caddeynta dakhliga guud ee la helay:	Dakhliga qoyska ee 3-da bilood kama badnaan karto hagayaashan dakhli:	
		Cabbirka Qoyska	Dakhliga
Agoosto 2022	Maayo, Juun, Luulyo 2022		
Sibteembar 2022	Maayo, Juun, Luulyo, Agoosto 2022	1	\$9,171
Aktoobar 2022	Luulyo, Agos, Sebt 2022	2	\$11,993
Noofeembar 2022	Agos, Sebt, Okt 2022	3	\$14,815
Diiseembar 2022	Sebt, Okt, Nof 2022	4	\$17,638
Jannaayo 2023:	Okt, Nof, Dis 2022	5	\$20,460
Febraayo 2022:	Nof, Dis 2022, Jan 2023	6	\$23,282
Maarso 2023	Di 2022, Jan, Feb 2023	7	\$23,811
Abril 2023	Jan, Feb, Maarso, 2023	8	\$24,340
Maayo 2023	Feb, Marso, Abril 2023	9	\$24,869

Caddeymaha la dirayo

- **Mushahar:** EAP waxay SSN-kaaga (lambarkaaga amniga bulshada) u isticmaali kartaa inay ku xaqiijiso mushaharka ay soo gudbiyeen cidda aad u shaqeyso. Waxa laga yaabaa inaanu kaa dalbano waraaq jeeg ama xaqiijin kale haddii aanu xaqiijin kari wayno mushaharkaaga.
- **MFIP, GA, DWP:** Waraaq gobol oo muujinaysa xaddiga billaha ah ama waraaqda dhaqdhaqaaqa bangiga.
- **Taageero lammaane ama lacagta masruufka kala tagga ka dib:** Nuqulo jeeg, waraaqaha dhaqdhaqaaqa bangiga, ama qoraal uu soo saxee xay bixiyuhu oo ay ku caddahay xaddiga lacagaha la baxshay iyo taariikhdu, ama caddeyn kale oo sheegaysa xaddiga lacagta la helay.
- **Gunnooyinka Halyeyada, Amniga Bulshada, RSDI iyo SSI:** Waraaqaha lagu baxshay, waraaqaha dhaqdhaqaaqa bangiga oo muujinaya dhigaalka, ama nuqulo jeeg.
- **Mag-dhow shaqaale, Naafonimo Muddo Ggaaban ama Muddo Dheer:** Ogeysiiska gunno siinta, nuqulada jeegaga mag-dhowga ama naafonimada shaqaalaha, xogta magdhowga ee shaqaalaha, ama xogta qareenka.
- **Cayrta Shaqo-la'aanta:** Waxa laga yaabaa inay EAP dakhligan ku xaqiijiso.

- **Isu-shaqeeya, Beer Leh, ama Dakhli Kiro:** Labada bog ee ugu horeeya cashuur celintaadii IRS-1040 ee ugu dambaysay iyo Jadwal 1. Haddii aadan soo guddin cashuurtaada, wac Adeeg Bixiyahaaga oo ka dalbo Foomka Isu-shaqeynta.
- **Dulsaarka, Faa'iido-Qaybsi:** Waraaqaha Dhaqdhaqaaqa Bangiga, IRS1099, ama IRS-1040.
- **Dakhliga Hawlgabka oo uu ku jiro Dakhliga IRA:** Jeegaga/waraaqaha gunnada, waraaqaha dhaqdhaqaaqa bangiga ama waraaqda bixinta.
- **Lacagaha hawlgabka iyo Maalgashiga dadka waaweyn:** Jeegaga/waraaqaha gunnada, waraaqaha dhaqdhaqaaqa bangiga ama waraaqda bixinta.
- **Dakhliga Qabiilku qofka siiyo, bakhshiiska, ama Lacagaha Xukunka:** Jeegaga/waraaqaha gunnada, waraaqaha dhaqdhaqaaqa bangiga ama waraaqda bixinta.
- **Bilaa Dakhli:** Haddii qoyskaaga aanay soo gelin wax dakhli ah ama qofna aanu idiin shaqeyn, wac Adeeg Bixiyahaaga.

****Fadlan soo dir nuqulada cadeynta dakhligaaga. Dukumeentiyada asalka ah lama celin doono****

Maxaa dhacaya marka xiga?

- Adeeg Bixiyahaaga Maxalliga ah ayaa dib u eegi doona codsigaaga oo kula soo xiriiri doona haddii ay u baahdaan macluumaad dheeraad ah.
- Haddii ay hayaan dhammaan macluumaadkii muhiimka ahaa, Adeeg Bixiyahaaga Maxalliga ahi wuxu codsigaaga uga hawlgeli doona sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah, oo waxaad heli doontaa waraaq kuu sheegaysa inaad kaalmo heli karto.
- Haddii la ansxiyo, waxaanu gunnadaada siin doonaa shirkadaha aad ku soo qortay codsigaaga.
- Haddii la diido, waxaanu kuu sheegi doonaa sababta iyo sida aad dib ugu soo codsan karto ama go'aanka rafcaan uga qaadan karto.

Taageerada tamarta ee degdega ah

Barnaamijka Taageerada Tamarta waxa laga yaabaa inuu ku kaalmeeyo haddii aad xaalad degdeg ah oo tamareed qabto. La Xiriir Adeeg Bixiyahaaga haddii:

- Kuleylkii ama korontada lagaa jaray ama lagaa jari doono
- Aad awoodi kari wayday in shidaalka lagu keeno
- Aad guriga adigu leedahay oo foornada dabku aanay kuu shaqeynayn

Lambarada Amniga Bulshada (SSNs)

SSNs waxa laga rabaa dhammaan codsadaayaasha marka laga reebo dadka ajaanibka ah ee u qalma ee codsanaya barnaamijka (tusaale, dadka degenaashaha joogtada ah haysta, magan-galyo doonka, qaxoontiga, iwm.). Haddii aadan bixin lambaro amni bulsho ama waraaqo socdaal oo sax ah, kama shaqeyn karno codsigaaga. Haddii aad tahay qof ajaanib ah oo u qalma barnaamijka, waxa laga yaabaa inaad SSN la'aan ku codsato. La xiriir Adeeg Bixiyahaaga si aad u ogaato dukumeentiyada la rabo. Haddii adiga ama xubnaha qoyskaagu yihiin ajaanib aan barnaamijka u qalmin, waxa laga yaabaa in qoyskaagu weli heli karo kaalmada haddii xubnaha qoyska midkood yahay muwaadin ama ajaanib barnaamijka u qalma. La Xiriir Adeeg Bixiyahaaga wixii tafaasiil ah. Gobolku wuxu SSN-yada u adeegsan doona maamulista EAP si loo hubiyo aqoonsiga, looga hortago laba-jeer ka qaybqaadashada, oo loo go'aamiyo u qalmista gunnooyinka dadwaynaha. SSN-kaaga waxa sidoo kale loo adeegsan doonaa in macluumaadka mushaharka iyo mag-dhowga lagaga helo Waaxda Shaqaaleynta iyo Koboca Dhaqaalaha ee Minnesota (DEED), lagu xaqiijiyo macluumaadka aad codsiga ku dhex bixisay, oo lagaga hortago, lagu ogaado, laguna saxo been-abuurka, khasaareynta, iyo si xun u isticmaalka.

Codsadaayaasha ajaanibka ah

Si aad kaalmo uga hesho Barnaamijka Tamarta ee Minnesota, waa inaad ahaataa muwaadin ama si sharci ah ku joogta Waddanka Maraykanka (US).

Gunnooyinka Kaalmada tamarta lama tiriyo marka la go'aaminayo faa'iidoyinka dadka ajaanibta ah. Waxaad kaalmo u codsan kartaa oo u heli kartaa xubnaha qoyska ee u qalma barnaamijka, xitaa hadii adiga ama xubnaha qoyska qaarkood aanay u qalmin xaaladdooda socdaal darteed. Xubnaha qoyskaaga ee ah ajaanib u qalma barnaamijka waa inay keenaan caddeynta xaalkooda socdaal. Bixi nuqulada labada dhinac ee kaararka socdaalka ama dukumeentiyada kale ee sheegaya xaalkooda socdaal ee xubin kasta oo qoyska ka mid ah oo ajaanib u qalma barnaamijka ah. Dhammaan xubnaha qoyska iyaga oo aan loo eegayn xaalkood socdaal ama muwaadinimo, waa inay baxshaan macluumaadkooda dakhli, balse keliya muwaadiniinta ama ajaanibka barnaamijka u qalma ayaa xubno qoys ahaan loo tirin doonaa. La xiriir Adeeg Bixiyahaaga si aad u ogaato waxa xaaladdaada laga rabo. **Ogolaanshahaaga la'aantiis, macluumaadka kugu saabsan lama wadaagi doono Waaxda Socdaalka iyo Jinsiyadaha ee Maraykanka (USCIS).**

Habraacyada Dakhliga U Qalmista Barnaamijka Taageerada Cimilada (WAP)

Waxa laga yaabaa inaad u qalanto Barnaamijka Taageerada Cimilada (WAP) xitaa haddii dakhliga qoyskaagu u ka sarreeyo xadka EAP. WAP waxay mulkiilayaasha iyo kireystayaasha u qalma siisaa cusbooneysiin dhanka tamarta guryaha ah taas oo ka caawisa marxinta tamarta kana dhigta gurigaaga mid caafimaad qaba oo aamin ku ah in lagu noolaado. Wixii macluumaad dheeraada ah, booqo <https://mn.gov/commerce/consumers/consumer-assistance/weatherization> ama wac **1-800-657-3710**

Sharciga Iska Ilaalinta Cimilada Qaboow

Haddii aad isticmaasho gaasta dabiiciga ah ama koronto si aad guriga ugu kulayliso ama aad u baahan tahay koronto aad kaga shaqeysiiso kuleyliyaahaaga ama marawaxadda foornadaada kuleylinta, waxaad xaq u yeelan kartaa Sharciga Iska Ilaalinta Cimilada Qaboow inta u dhaxaysa Oktoobar 1 iyo Abriil 30.

- Sharciga Cimilada Qaboow wuxu kaa caawinayaa inaad iska ilaaliso in adeegga lagaa jaro ama wuxu kaa caawinayaa in aad adeega dib u soo xirato.
- **Si aad u hesho iska ilaalinta Cimilada Qaboow, waa INAAD la xiriirtaa shirkadaha ku siiya tamarta oo la sameysataa qorshe lacagbixineed kuna taagnaataa. Haddii aad seegto lacagbixin, waad waayaysaa ilaalintaada waxaadna waayi kartaa adeega kuleylinta.**
- Haddii aad hesho Taageero Tamareed, waxaad horey ugu sii qalmeyso Sharciga Iska Ilaalinta Cimilada Qaboow. Barnaamijka Kaalmada Tamartu maaha qorshe lacag bixineed mana beddelayo lacagtii aad u baahan tahay inaad bixiso.
- Adeeg Bixiyahaaga ayaa kaa caawin kara inaad qorshe lacagbixineed macquul ah la sameysato shirkadaha tamarta.

Tri-County Action Program, Inc.
1210 23rd Ave S
PO Box 683
Waite Park MN 56387
Phone: (320) 251-1612 or 1-888-765-5597
Fax: (320) 654-9473
Email: general@tricap.org
www.tricap.org

Xafiiska ayaa isticmaalaya

oo keliya

HH: _____

Tixraac _____

Rep#: _____

Xaddiga deeqda: _____

Fadlan isticmaal khad madoow si aad ugu buuxiso codsigaaga. Dukumeentiyada aad dirayso ha u isticmaalin calaamadeeyayaal.

CODSIGA BARNAAMIJKA TAMARTA EE MINNESOTA 2022-2023



Ka hor intaadan buuxin codsigan, si taxaddar leh u akhri "Masuuliyadahaaga iyo Xuquuqdaada" ee ku lifaaqan iyo tilmaamaha.

Qaybta 1. Macluumaad Shaqsiyeed - Xaqiiji in dhammaan xogta codsigan horey ugu daabacnayd ay saxan tahay. Isbedelada sida la rabo u samee.

Lambarkaaga Amniga Bulshada (SSN)	<ul style="list-style-type: none">Lambarada Amniga Bulshada (SSNs) ayaa laga rabaa dhammaan xubnaha qoyska waana la hubin doonaaHaddii aan SSN ansaxa lahayn, dukumeenti nooc kale ah ayaa la rabaaHaddii xubnaha qoyska midkood yahay ajaanib aan barnaamijka u qalmin, waxa laga yaabaa in qoyskaagu weli heli karo kaalmada haddii 1 ka mid ah xubnaha qoyska yahay muwaadin ama ajaanib barnaamijka u qalma.SSN-kaaga waxaanu u isticmaali doonaa si aanu u helno macluumaadka cayrta shaqo-la'aanta
--	---

Magaca Sharciga ah:	BB– MM– SSSS		
Magaca Koobaad	M.I.	Magaca Dameb	Taariikhda Dhalashada

Cinwaanka Meesha Aad Hadda Ku Nooshahay	Cinwaanka Boostada (hadduu ka duwan yahay halkaad ku nooshahay)
Lambarka Guriga iyo Dariiqa	Dariiqa ama Sanduuqa Boosta
Apt #	Apt #
Magaalo	Magaalo
MN	
Gobol Zip Code	Gobol Zip Code
Gobolka	

Luuqadda Aad ku Hadasho:	Taleefanka	Taleefan
	Koobaad: (_____) _____	Kale: (_____) _____
	<input type="checkbox"/> Taleefanka gaacanta	<input type="checkbox"/> Taleefanka gaacanta

limayl	Si la iigula soo xiriiro Qoraal, waxaan door bidayaa: (Dooro mid qura)
Ciwaanka: _____	<input type="radio"/> Boostada Maraykanka (Waraaq) <input type="radio"/> iimayl

Wakiil Idman: Haddii aad buuxiso qaybtan, "Wakiil Idman" ayaa ogolaansho u haysta inuu ku metelo balse ma saxiixi karo codsiga illaa iyo isagoo sharciyan loogu idmo inuu sidaas yeelo maahane, (tusaale, Qareen uu Awood u Siiyo, Masuul ama Ilaaliye ah). Dukumeentiyada wakiilka soo raaci codsiga.

Magaca koobaad _____

Magaca dambe _____

Taleefan _____

Waxaan rabaa in **Wakiil Idmani** waraaqdeyda boosta helo isagoo i metelaya (haddii aad saxdo, cinwaankiisa hoos geli.)

Dariiqda ama Sanduuqa Boostada _____

Apt # Magaalo _____

Gobol Zip Code _____

WAA INAAD CODSIGAN KU SAXIIXDAA OO KU TAARIKHAYSAA GUNTA HOOSE EE BOGGA

Qaybta 2. Macluumaadka qoyska

Liistee dhammaan xubnaha qoyska, adiga oo adigu isku bilaabaya (waalidiinta caruurta dhalay ee aan haysan waxay ku dari karaan caruurtooda yaryar):

LOO BAAHAN			6-DII BILOOD EE DAMBEYSAY						
Lambarka Amniga Bulshada Tus: 555-55-5555	Magaca Sharciga Magaca Hore M.I. Dambe Tus: Pat T. Smith	Taariikhda Dhalashada bb-mm-ssss	Gunoyin Dakhli/ Y/N	Shaqaalaysi Tirada	Jinsiga Ku qor Tus: Dheddig	Sinji Eeg Hoose Y/N	Hisbaanik Y/N	Nafoah Y/N	Halyey Y/N
(Aniga)		- -							
		- -							
		- -							
		- -							
		- -							
		- -							
		- -							
		- -							

Ku soo lifaaq waraaq dheeraad ah haddii loo baahdo si aad ugu qorto xubnaha qoyska ee dheeraadka ah.

Sinji:	A = Eeshiyan B = Madow ama Afrikaan Maraykan P = Dhaladka Huwaay ama Aylaanderada Baasifiga ee Kale	I = Hindi Mareykan ama Dhaladka Alaska W = Caddaan M = Jinsiyo Badan O = Kale
---------------	---	--

- Immisa qof ayaa gurigaaga ku nool? _____ Miyaa xubnaha qoyskaaga mid ka mid ah dakhligiisu yaraaday? Kuma.....
- Miyuu qof qoyskaaga ka mid ahi hadda yahay shaqaale hadda ka shaqeeya ama xubin boor ka ah haayadda taageerada tamarta? Haa Maya
- Miyaad rabtaa inaad codeyn isu-diiwaan geliso ama aad cusbooneysiiso diiwaangelintaada haddii aad guurto? Haa Maya
- **Sidee baad ku maqashay barnaamijka Taageerada Tamarta?** Asxaabta/Qoyska Jaraa'id Tabeelle Baraha Bulshada/Xayaysiin Dhijitaal ah
- Raadiye Kireeye Shaqaalaha Maamulka Xafiiska Halyeyada Websaydka Gobolka ama Maamulka Shidaal/Adeeg Keene
- Kale _____

Dakhli, Gunnooyin, iyo kaalmooyinka kale: 3-dii bil kalandar ee u dambeeyay ka hor intaadan saxiixin codsigan, hubi dhammaan kuwa ku habboon xubin kasta oo qoyskaaga ka mid ah **soona raaci** codsigan.

Dakhliga

- Mushaharo
- Isu-shaqayn*/Dakhliga Beerta*
- Sannadka iyo bisha la bilaabay: _____ - _____

**Soo dir 2-da bog ee u horreeya iyo Jadwalka 1 ee cashuur celiskaaga u dambeeyay ee IRS-1040*

- Cayrta Shaqo-la'aanta

- Dakhliga Dulsaarka ama Faa'iido Qaybsiga
- Dakhli Kiroole

- Magdhowga Shaqaalaha
- Qandaraaska Maalgashiga Dulsaarka

Gunnooyin

- Gunnooyinka Amniga Bulshada (SSDI, RSDI, SSA)
- Dakhliga Amniga ee Dheeraadka ah (SSI)
- Bisilka/Lacagta Dadka Waaweyn (ay ku jiraan rubucle & sannadle)
- Dakhliga Hawlgabka (oo uu ku jiro Dakhliga IRA, iwm.)
- Barnaamijka Maalgashiga Qoyska (MFIP ama TANF)
- Taageerada Guud (GA) – **Gunnooyinka Naqadka ah**

- Gunnooyinka Halyeyada
- Lacagaha Qabiilka Qofku Siiyo
- Lacagaha Xukunada Qabiilka ama Bakhshiishka Qabiilka
- Naafoonimada Muddada Dheer/Gaaban
- Taageerada Laamanaha ama Furriinka ka dib
- Shaqooyinka Leexsan (DWP)

Wax caddeyn dakhli ah looma baahna:

- Taageerada Ilmaha - Lacagaha Billaha ah \$ _____
- Taageerada Cuntada
- Deynta Cashuurta Dakhliga la Kasbaday
- Taageerada Dheeraadka ah ee Minnesota (MSA)

- Bilaa Dakhli: Fadlan wac adeeg bixiyahaaga

Kaalmada Kale

- Dakhliga kale ee aan la liisteyn: _____

Codsigaaga dib ayaa loo dhigayaa haddii aadan soo raacin dhammaan caddeymaha

Qaybta 3. Macluumaadka Guriyaynta

Waxaan ku nool nahay: Guri Abaarman/Koondo Guri-dawladeed Guri Socda Duplex Triplex Fourplex Kale _____

Illaa intee ayaad ku noolayd gurigaaga hadda? _____ Sannadood _____ Bilood _____

Waxaan bixiyaa: Kiro Deyn Guri Ma baxsho lacag bille ah.

Haddii aad lacag bixiso, dakhliga billaha ah ee aad bixiso: \$ _____ **baa la iga rabaa**

Waxaan ahay kireyste:

Ma hesha kaabis kiro miyaadse ku nooshahay guri la kaabo?

- Haa Maya

Kharashka kuleylinta ama korantadu miyay ku jiraan kirada?

Sax kuwa ku habboon: Kuleylinta Koronto

Macluumaadka Kireystaha

Magac: _____

Taleefan (_____) _____

Dariiqa ama Sanduuqa Boosta.

Apt# _____

Magaalo _____ Gobol _____ Zip Code _____

Waxaan leeyahay guri:

Miyaad leedahay ama aad gadan rabtaa gurigaaga?

- Haa Maya

Haddii nidaamka kuleylinta/foornada gurigaagu **AANU** hadda

shaqeynayn, sax sanduuqan:

Isla markiiba wac Adeeg bixiyahaaga haddii nidaamka kulaylku aanu shaqaynayn.

Kireystayaasha iyo Mulkiilayaasha guryaha:

Haddii aad adigu isu-shaqeyso, ganacsiga ma gurigaaga ayaad ka

waddaa? Haa Maya

Haddii ay **Haa** tahay, waa maxay nooca ganacsiga iyo shaqada aad ku qabato gurigaaga?

_____ Gurigaaga qayb ka mid ah miyaad cid kale ka kireysaa?

- Haa Maya

Qaybta 4. Tamar Bixiyayaasha

Shirkadahee ayaa gurigaaga siiya korontada, Kuleylinta iyo biyaha*?

Nuqul biilashaadii u dambeeyay iyo/ama rasiidhadii shidaalka ah noo soo raaci codsigan.

***Waxa laga yaabaa in kaalmo lagu helo haddii aad hayso biilka biyaha oo kugu muddo dhaafay.**

	Kuleylilinta Guud	Kuleylinta Kale	Koronto	Tamarta Cadceedda	Biyo
Magaca Shirkada					
Shidaal Nooca:	<input type="radio"/> Gaasta Dabiiciga ah <input type="radio"/> Borobayn <input type="radio"/> Saliid <input type="radio"/> Shidaalka noolaha <input type="radio"/> Uumi	<input type="radio"/> Gaasta Dabiiciga ah <input type="radio"/> Borobayn <input type="radio"/> Saliid <input type="radio"/> Shidaalka noolaha <input type="radio"/> Uumi	<input type="checkbox"/> Isha Kuleylilinta guud waa koronto		
Lambarka Xisaabta:					
Magaca Xisaabta Ku Qoran:					

Illaa iyadoo hoos lagu muujdo maahane, gunnadaada waanu kala qaybin doonaa. 70% waxa la siin doonaa shirkadaada kuleylinta guud 30% iyana waxa la siin doonaa shirkadaada korontada.

IKHTIYAARI: Haddii aad rabto in gunnadaada in si sidan ka duwan loo baxsho, hoos ku muuji:

Dhammaan ku bixi kuleylinta guud Dhammaan ku bixi korontada

Kale: _____

Taangigaaga shidaalka ama saacadda korontada miyaad cid kale la wadaagtaa? Haa

Maya

Haddii aad kuleylinta u isticmaasho xaabo ama shidaal noole oo kale:
 Shidaalka noolaha aad isticmaasho - Xaabo
 Qurubo Galley Wax Kale
 Boqolkiiba kuleylintaada intee ayay tani soo saartaa? _____ %
 Immisa qol hurdo ayuu gurigaaga ka kooban yahay?
 Ma adigaa keensada xaabadaada/galleydaada? Haa Maya

Gargaarka Degdegga ah ee Biyaha iyo Tamarta

Haddii aad hadda wajahayso xaalad degdeg ah ama aad iska bixin kari wayday kharashkii biyaha oo muddo dhaafay, ka dooro nooca xaaladda hoos oo noo soo dir nuqul ogeysiiska ah:

Horey looga jaray. Shirkadda: _____ Taariikhda la jaray: _____

Helay ogeysiiska jarista: Shirkadda: _____ Taariikhda la qorsheeyay: _____

Bixin kari waayay kharashka biyaha oo muddo dhaafay. Shirkadda: _____ (biyaha oo keliya)

Taangiga shidaalka oo maran (ama ay ku jiraan wax ka yar 20%) Waa maxay % ee ku jiraa taangigaaga maanta: _____

La xiriir shirkadaada tamarta si aad u dejisaan qorshaha aad lacagta ku

Qaybta 5. Ogotashaha iyo saxiixa Oktoobar 1, 2022 illaa Sebteembar 30, 2023

- 1 Waxaan shirkadaha adeegyada kuleylinta, korontada iyo biyaha ogolaansho u siiyay inay xogta xisaabtayda iyo isticmaalkayga korontada iyo biyaha siiyaan Waaxda Ganacsiga ee Minisoota (Ganacsiga) iyo Qandaraaslayaasha Ganacsiga si loogu adeegsado Barnaamijka Taageerada Tamarta (EAP), Barnaamijka Taageerada Cimilada (WAP) iyo Barnaamijka Horumarinta Tamar-tashiilka.
- 2 Waxaan u ogolaaday Maamulka Amniga Bulshada, Waaxda Adeegyada Aadamaha ee Minnesota iyo wakaaladaha la xulafada ah, iyo Waaxda Shaqaaleynta iyo Horumarinta Ganacsiga ee Minnesota inay xogtayda khuseysa Lambarka Amniga Bulshada, gunnooyinka dadwaynaha ee aan helo, iyo dakhligayga sannadkii u dambeeyay si Ganacsiga iyo qandaraaslayaasha Ganacsigu ugu adeegsadaan EAP, WAP, iyo CIP.
- 3 Waxaan EAP, WAP, iyo CIP-da Minnesota u ogolaaday inay:
 - La xiriiraan cidda aan u shaqeeyo si ay u xaqiijiyaan dakhligeyga.
 - La xiriiraan mulkiilaha guriga aan ku jiro si u xaqiijiyaan Meesha aan deganahay iyo/ama isha aan kuleylka ka helo haddii aan kireyste ahay.
- 4 Waxaan Adeeg Bixiyayaashayda EAP, WAP, iyo CIP u ogolaaday inay igala soo xiriiraan wixii xiriir dheeraada iyo sii gudbin ah.
- 5 Markaan saxiixo, waxaan qirayaa in dhammaan xogta codsigan ku jirta ay sax tahay. Waxaan sidoo kale qirayaa in:
 - Aan hadda deganahay cinwaanka ku qoran codsigan.
 - Aan saxiixayo codsiga aniga oo metalaya dhammaan xubnaha qoyskayga.
 - Ay dhici karto in la iga dalbado inaan caddeeyo bayaanadeyda.
 - Ay dhici karto in si waafaqsan shuruucda federaalka ama gobolka la igu soo oogo dambi madani ah ama mid maxkamadeed haddii aniga oo og aan macluumaad been ah ama been-abuur ah sameeyo.
 - Waxaan leeyahay xuquuqaha ku jira EAP, WAP, iyo CIP. Waxaan helay nuqul "Ogeysiiska Asturnaanta iyo Xuquuqaha iyo Masuuliyada ah" oo waan aqbalay shuruudihisa iyo sharciyadiisaba.
 - Rafcaan ayaan ka qaadan karaa go'aamada Bixiyaha Adeegga Taageerada Tamareed ee ku saabsan gunnooyinkayga.
 - Waan fahamsanahay in macluumaadka maqani uu daahin karo go'aaminta inaan u qalmo kaalmo.
 - Waan fahamsanahay in Adeeg Bixiyahaygu uu awoodi karo inuu iga caawiyo bixinta kharashka tamarta ee muddo dhaafay iyo/ama inuu ila sameeyo qorshe aan lacagta ku siiyo shirkadaha tamarta.
 - Waan fahamsanahay in buuxinta codsigani aanay dammaanad qaadeyn in qoyskaygu heli doono taageero.
 - Waxaan ahay qof weyn, qof yar oo masuul ah, ama qof yar oo madaxii qoyska ah oo aan la nooleyn wax dad waaweyn ama qof yar masuula ah.

Magaca Daabacan: _____

Saxiixa: _____ **Taariikhda Maanta:** _____

Dhammaan codsiyada waa in boosta la soo dhigaa ama EAP ay helaan May 31, 2023 ama ka hor.

Codsigaaga waa in boosta lagu soo dhigaa muddo 60 beri gudahooda oo ka bilaabmeysa taariikhda aad saxiixday.

Hore u codso, lacagtu way dhammaan kartaa.

Ogeysiiska Asturnaanta iyo Xuquuqahaaga iyo Masuuliyadahaaga.

Ogeysiiska Asturnaanta

Qodobada Xeerka Asturnaanta Shuruucda federaalka iyo kuwa gobolka ayaa naga raba inaanu kuu sheegno xuquuqadaada iyo masuuliyadahaaga ka hor intaan ka uruurin macluumaad loo aqoonsaday inay khaas ama sir yihiin. Foomkani wuxu ku siinayaa macluumaad u hogaansan Xeerka Asturnaanta ee Federaalka ee 1974 1974, 5 U.S.C. § 552a(e)(3) iyo Xeerka Dhaqamada Xogta Dawladda ee Minnesota, Minn. Stat. § 13.04, subd. 2 (oo sidoo kale loo yaqaan digniinta Tennessee).

Fadlan si taxaddar leh u akhri *Ogeysiiskan Asturnaanta* ka hor intaan buuxin oo saxeehin *Codsiga Barnaamijka Tamarta ee Minnesota*, oo *Ogeysiiskan Asturnaanta* keydso si aad mustaqbalka u isticmaashid. Ogeysiiskan Asturnaanta wuxu ku dabbaqmayaa Barnaamijka Taageerada Tamarta (EAP), Barnaamijka Taageerada Cimilada (WAP), iyo Barnaamijka Kor-u-qaadista Tashiilka (CIP), oo sidoo kale loo yaqaan Barnaamijyada Tamarta.

Waa maxay sababta aanu codsiga macluumaad ugu uruurino?

Waxaanu macluumaadkaaga u adeegsan doonaa inaanu ku baarno, ku qiimeyno oo ku maamulno Barnaamijyada Tamarta. Macluumaadka waxaanu ugu baahanahay:

- Inaanu dadka kale kaaga aqoonsanno.
- Inaanu ku ogaano inaad kaalmo u qalanto.
- Inuu noo sahlo inaanu kaalmadaada u helno lacago federaal ama gobol.
- Si aanu u buuxino shuruudaha warbixinta gobolka ama federaalka.

Ma kugu waajibaa inaad na siiso macluumaadka?

Waxaad xaq u leedahay in aadan na siin macluumaadka aanu ku waydiino.

Maxaa dhacayaa haddii aad macluumaad na siiso ama na siin waydo?

Haddii aad na siiso macluumaadka lagu dhex codsaday codsiga, codsigaaga waa laga shaqeyn doonaa. Haddii aad na siin weydo macluumaadkaas:

- Codsigaaga lagama shaqeyn doono.
- Waxa laga yaabaa inaad helin adeegyada.
- Waxa laga yaabaa inaad heli kaalmada kharashka tamarta.
- Waxa laga yaabaa in adeegyadaadu dib u dhacaan.

Waanu hayn doonaa macluumaad kasta oo aad na siiso, codsiga haddii la aqballo iyo haddii aan la aqbalinba.

Yaa laga yaabaa inay arkaan codsigan?

Dadkan soo socda ayaa laga yaabaa inay helaan macluumaadka ku jira codsigaaga Barnaamijyada Tamarta haddii: (i) ay u baahdaan inay helaan macluudka codsiga si ay u qabtaan shaqadooda la xiriirta Barnaamijyada tamarta (EAP, WAP, iyo CIP), ama (ii) uu si kale sharciga federaalka ama gobolku awood ugu siiyay inay arkaan, ama (iii) ay macluumaadka u adeegsanayaan ujeedooyin warbixaneed, cabbirista natiijooyinka, sii gubin ama u qalmiseed.

- Bixiyayaasha Adeega Barnaamijyada Tamarta ee Maxalliga ah oo ku shaqeynaya qandaraaska ay kula jiraan Waaxda Ganacsiga ee Minnesota (Ganacsiga).
- Qaybta Deeqaha ee Adeegyada Bulshada Minnesota iyo Bixiyayaasha Adeegyada Deeqaha Bulshada ee Minnesota oo ku shaqeynaya qandaraaska ay kula jiraan Ganacsiga.
- Hanti-dhowrayaasha barnaamijka si waafaqsan hagitaanka Xafiiska Maamulka iyo Miisaaniyadda (OMB).
- Waaxda Maamulka ee Minnesota, Ganacsiga, Waaxda Shaqaaleysiinta iyo Koboca Dhaqaalaha, Caafimaadka, Wakaaladda Maalgelinta Guriyaynta, Adeegyada Adamaha, Adeegyada Dakhliga iyo MN.IT.
- Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Adamaha iyo Tamarta ee Maraykanka.
- Guddidda Adeega Bulshada ee Minnesota.
- Kormeeraha Sharciga ee Minnesota.
- Shaqsiyaadka loogu ogolaaday si waafaqsan amar maxkamadeed.
- Shirkadahaaga tamarta oo u isticmaalaya (go'aaminta) waxaad iska bixin karto iyo Barnaamijyada Tamarta.
- Iskaashiga Bulshada Minnesota (Minnesota Community Action Partnership).
- Maamulka Amniga Bulshada ee Maraykanka.
- Wakaaladaha ama hay'daha kale ee sharciga federaalka ama gobolku u ogol yahay.

Maxaan u uruurinaa Lambarada Amniga Bulshada?

Waxaanu Lambarada Amniga Bulshada u adeegsanaa maamulka Barnaamijyada Tamarta (EAP, WAP, iyo CIP) si aanu u hubino in codsadayaaasha iyo xubnaha qoyskoodu ay helaan keliya gunnooyinka la ogol yahay. Sharciga federaalka ayaa noo ogol inaan kaa dalbano inaad sheegto Lambarkaaga Amniga Bulshada si aanu uga shaqeyno codsigaaga oo aanu uga hortagno, una saxno been abuurka iyo si xun u adeegsiga. OGOLAANSHAHA: Qaybta 205(c)(2)(C)(i) ee Xeerka Amniga Bulshada, 42 U.S.C. § 405(c)(2)(C)(i). Dhammaan codsadayaaasha (marka laga reebo ajaanibka u qalma) waxa laga rabaa inay bixiyaan Lambarka Amniga Bulshada oo la xaqiijin karo si looga shaqeeyo codsiga.

Maxaan u waydiinaa macluumaad ku saabsan jinsigaaga?

Kani waa macluumaad ikhtiyaari ah. Waxa loo qoraa loona kaydiyaa ujeedooyin tiro-koob oo keliya dartood. Barnaamijku cidna kuma faquuqi karo sabab jinsi, qawmiyadda laga soo jeedo, diin, sinji, fikir galmo, ama xulaf siyaasadeed.

Xuquuqahaaga iyo Masuuliyadahaaga

Waxaad xuquuqo gaar ah u leedahay inaad kaalmo

hesho:

Waxaad xaq u leedahay:

- Inaad markale soo codsato haddii lagu diido.
- Inaad kaalmo dheeraad ah codsato haddii aad u baahan tahay.
- Inaad ogaato shuruucda iyo sidaan u go'aamino cidda kaalmada helaysa.
- Inaad jawaab ku hesho waqti macquul ah ka dib markaad soo gudbiso dhammaan macluumaadka.
- Inaad rafcaan ku qaadato muddo 30 beri gudahood ka dib marka lagu soo diro natijada codsigaaga haddii:
 - Aad hesho warqad diidmo ah oo aad u maleynayso inaanu isticmaalnay macluumaad khaldan si aanu go'aanka u gaarno.
 - Aadan heli kaalmadii lagu ballan-qaaday.

Waxaad leedahay masuuliyadahan:

Waa inaad noo sheegtaa haddii aad adiga ama qof qoyskaaga ka mid ahi:

- Helay kaalmo biilasha tamarta ah jiilaalka qaybtiisii hore.
- Uu u guuray ciwnaan cusub (noogu sheeg 30 beri gudahood oo guurista ka bilaabantay)
- Aad bedeshay cidda shidaalka ama gaasta kuu keenta ama shirkadda korantada.

Waxa laga yaabaa in barnaamijka bixiyo keliya qayb biilashaada kuleylinta iyo korontada ah. Adiga aya ka masuul ah inaad bixiso haraaga.

Ka warran haddii aad fileyso in macluumaadka galkaaga ku jiraa uu khaldan yahay?

Kala hadal Adeeg Bixiyahaaga EAP ee maxalliga ah waxa aad u maleynayso inuu ka khaldan yahay galkaaga.

Maxaa dhacaya haddii aad bixiso macluumaad khaldan?

Adeeg Bixiyahaaga EAP ee maxalliga ah ama Waaxda Ganacsiga ee Minisoota waxay eegi karaan oo hubin karaan macluumaad kasta oo ku jira codsigaaga ama si kale lagu baxshay. Gunnooyinka Barnaamijka Tamarta waa lagu diidi karaa haddii aad bixiso macluumaad kala dhiman ama been ah. Waxa dhici karta in si waafaqsan shuruucda federaalka ama gobolka laguugu soo oogo dambi madani ah ama mid maxkamadeed haddii adiga oo og aad macluumaad been ah ama been-abuur ah soo raaciso codsigaaga.

Sida cabasho loo soo gudbiyo:

Haddii aad u maleynayso in lacagbixintaada tamartu aanay ahayn sidii laga rabay ama aadan helin adeegyadii aad filaysay inaad hesho, waxaad la xiriiri kartaa Adeeg Bixiyahaaga EAP ee maxalliga ah ee ku qoran codsiga. Haddii aadan ku qanacsanayn jawaabtooda, waxaad warqad rafcaan ah u qori kartaa Adeeg Bixiyaha EAP ee maxalliga ah. Kaydso cinwaankooda iyo lambarka taleefankooda.

Haddii aadan ku qanacsanay jawaabtooda rafcaankaaga, warqad u qor:

Sarkaalka Rafcaanada
Barnaamijka Kaalmada Tamarta
Waaxda Ganacsiga ee Minisoota
85 East 7th Place, Suite 280
St. Paul, MN 55101-2198

Haddii si dadka kale ka duwan laguula dhaqmay sababo midabkaaga, jinsigaaga, dhalshadaada asalka ah, diintaada, sinjigaaga, da'daada, xaalkaaga guur, siyaasadaha aad rumaysan tahay, naafonimadaada jireed ama maskaxeed daraadeed, warqad u qor kuwan soo socda midkood:

Waaxda Xuquuqda Aadanaha ee
Minnesota
Grigg's Midway Building
540 Fairview Ave. N, Suite 201
St. Paul, MN 55104
<https://mn.gov/mdhr/>

Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada
Aadamaha ee Maraykanka
-AMA- Xafiiska Xuquuqaha Madaniga ah, Gobol V
233 North Michigan Avenue, Suite 1300
Chicago, IL 60601
www.hhs.gov/ocr/civilrights/complaints